



Adeegyada caafimaadka ee dadka deggan degmada Fredrikstad oo la kulma caqabado kadib Covid-19.

Waxaa Fredrikstad ku sugan qiyaastii 4,200 oo qof oo laga helay covid-19 labadii sano ee la soo dhaafay. Dadka qaarkood waxay la kulmaan waxyeelo xagga neefsashada oo adkaata, dawakh, muruq iyo xanuun laabatooyin, dhib ka ah feejinaanta iyo xusuusta, nasasho la'aan, walaac, dhibaatooyin hurdo, daal ama astaamo kale.

Degmada Fredrikstad ayaa, dhiirigelin aay ka heshay degmada Bergen, waxay diyaarisay dalab la qabsasho koox-kooxeed ah oo ku salaysan wada-hadal dad badan, baridda muwduucoyo khuseeya, iyo waxqabad diiradda la saarayo neefsashada, nasashada, xoogga iyo xaaladda adkaynta jirka. Ehelka xita waa lagu soo dhaweynayaa inay ka soo qeybgalaan koorsadan.

Barnaamijkan wuxuu ka dhacayaa hoyga caafimaadka (Helsehuset) ee Fredrikstad, Wuxuuna bilaabnna badhtamaha Oktoobar, wuxuuna soconayaa siddeed toddobaad. Waxaa jiri doona kulan xog-waraysi ah toddobaadka 41aad, oo leh macluumaad ku saabsan soo-jeedinta. Kuwa aan doonayn inay ka qaybqaatan barnaamijkan kooxda, waxay heli doonaan macluumaad ku saabsan adeegyada kale ee khuseeya oo si gaar ah loo bixiyo. Barnaamijkan wa bilaash.

Shuruudaha ka qaybgalka

- Inuu kugo dhacay caabuqa koronaha oo aad qabto waxyeello ka soo gaartay covid-19 oo sameeyo hawl maalmeedkaaga.
- Waa inaa ugu yaraan 12 toddobaad ka hor ahaayd waqtigi aad isku aragtay astaamaha caabuqa.
- Waa inaad ku nooshahay degmada Fredrikstad oo aad ugu yaran tahay 16 jir.

- Diyaarna u tahay inaad bilowdo dhaqancelin caafimaad, oo aad heysato fursad iyo waqti oo u qoondeyso barnaamijkan.

Barnaamijka kuma xirno inuu qofka xanuunka covid-19 lala dhigay isbiitalka iyo in kale.

Yaa ka mas'uul ah barnaamijkan?

Shaqaalo ka soocdo kooxo xirfadeed oo kala duwan oo khibrad u leh caafimaadka jirka iyo maskaxada labadaba. Qof kasta wuxuu u shaqeeye sidii caadiga ah wakaalada "Friskliv og Mestring", degmada Fredrikstad.

Diiwaangelinta ama su'aalaha?

Qofku waxuu la xirriiri karaa "friskliv og mestring", taleefanka 69306760 ama iimayl u dir friskliv@fredrikstad.kommune.no